FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

**DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA**

لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 18-aad. Garowe . 03 Septemper.2016.** **Lam.8**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Sharciga Kufsiga Dawladda Puntland.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr.4. 03/9/2016, kuna saabsan Sharciga Kusfiga Dawladda Puntland.***

Sharci Lr.4. ee 02 September 2016, kuna saabsan Sharciga Kufsiga Dawladda Puntland.

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/61/ 2016 ee 31/8/2016;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Kufsiga Dawladda Puntland;

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Prof Cabdiweli maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILADA**

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

## Xafiiska Guddoomiyaha

## Office of the Speaker

***Ref*:-XGGW/DPL/ 61 /2016** **Arbaca, Garoowe** **Date:-31/08/2016**

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Kufsiga Dawladda Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL Qodobadiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweyne ku xigeenka DPL MWK/DPS/531/2015 ee 1,December -2015 kuna saabsan Xeerka ka hortaga Kufsiga Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Kufsiga Dawladda Puntland. |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku Ansixiyey kalfadhiga 37-aad fadhiga 26-aad 20/08/2016. Xeerka Kufsiga Dawladda Puntland. |

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Xeerka Kufsiga Dawladda Puntland.

**Allaa Mahad Leh**

**Md. Axmed Cali Xaashi**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Tell:- +252 90 7799977

Email: haashi7999@gmail.com parliamentspeaker@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com

# XEERKA KUFSIGA EE DAWLADDA PUNTLAND

## CUTUBKA KOOWAAD

1. Magaca Xeerka
2. Eray-bixin
3. Ujeeddooyinka Xeerka
4. Macnaha Oggolaanshaha
5. Takoor la'aan

## CUTUBKA LABAAD : DENBIYADA KUFSIGA IYO XADGUDUBYADA LA HAL-MAALA

6. Kufsi
7. Kufsi Kooxeed
8. Daandaansi & Handadaad Galmo
9. Ku Khasbid Galmo qof kale
10. Ka ganacsi & addoonsi Galmo (kufsi)
11. Cadaadis Galmo
12. Is-qaawin
13. Afduub
14. Soo Saarista, iibinta iyo Baahinta Muuqaalada Anshax-xumada ah
15. Daroogayn ula kac ah
16. Qof u sixrid ujeeddo kufsi

## CUTUBKA SADDEXAAD: BAARISTA DENBIYADA KUFSIGA

17. Xareynta Dacwadda
18. Waajibaadka Saaran Saraakiisha Booliiska ka dib Helidda Dacwadda
19. Waajibaadka Xafiiska xeer Ilaalinta
20. Gudasho La'aan Baaris Fal Denbiyeed Kufsi
21. Awaamiir Badbaadin iyo Ilaalin

## QAYBTA AFRAAD : XUQUUQDA DHIBBANAHA IYO EEDAYSANAHA

22. Xuquuqda Daryeelka Caafimaad iyo Warbixinta oo Bilaash ah
23. Kaalmada Sharci
24. Bilaabista dacwad madani ah
25. Xuquuqda ilaalinta Dhibbanaha iyo Markhaatiga
26. Xuquuqda Eedaysanaha

## CUTUBKA SHANAAD: CADDEYMAHA DACWADDA

27. Caddaymaha La aqbali karo

28. Caddeymo aan la aqbali karin

## CUTUBKA LIXAAD: CIQAABTA KUFSIGA

29. Qaybaha Ciqaabaha
30. Xukumidda Magdhowga
31. Caddeynta Qofka Dhibbanaha ah
32. Lawareegidda agabka Danbiga lagu galay
33. Mas'uuliyad Wadareedka Dembiilayaasha
34. Gellidda wax ka badan hal Dembi ee Xadgudubyada Kufsiga
35. Is-hortaagga Caddaaladda

## CUTUBKA TODDOBAAD: HIRGELINTA XEERKA KUFSIGA

36. Dejinta Qorshaha Fulinta Sharciga Xadgudubyada Kufsiga
37. Guddiga fulinta Xeerka xad-gudubyada Kufsiga
38. Soo saarista xeer-hoosaadyo

## CUTUBKA SIDDEEDAAD: AWOODDA MAXKAMADAHA

39. Awoodda Maxkamadeed
40. Ikhtisaaska Maxkamdeed ee Dhaafsiisan Dalka

## CUTUBKA SAGAALAAD: DIIWAANKA DAMBIYADA KUFSIGA

41. Diiwaanka dembiileyaasha Kufsiga

## CUTUBKA TOBNAAD: BURIN IYO DHAQAN-GAL

42. Burin iyo Laalid
43. Dhaqan-galka Xeerka

## Hordhac

Iyada oo laga duulayo ujeedooyinka Guud ee shareecada Islaamka ee ilaalinaya Nafta iyo sharafta qofka, reebayana xadgudub kasta oo loo geysto qofka jirkiisa iyo maskaxdiisa, isla mar ahaantaantaana laga duulayo qodobada qaanuuniga ee ku xusan Dastuurka ku meel gaarka ah ee Dawlada federaalka Soomaliyeed ee damaanad-qaadaya xuquuqaha kala ah sharafta iyo karaamada Qof kasta (qodobka 10aad) , nolosha (qodobka 13aad) , sinnaanta iyo takoor la'aanta Qof kasta (qodobka 11aad) , nabagelyada iyo ilaainta jireed ee Qofka (qodobka 15aad) , shafshafaynta Qofkasta oo xadgudub lagula kacay lid ku ah xuquuqdiisa bini-aadaminimo (qodobka 39aad) iyo in Qofkasta uu heli karo cadaaladda oo aan laga xigsan (qodobka 34aad), iyadoona uu dastuurku sidoo kale amrayo la dagaallanka dhammaan noocyada kala duwan ee shaqaaqooyinka lidka ku ah dumarka (qodobka 15aad);

Iyada oo laga duulayo qodobada dastuuriga ah ee ku xusan dastuurka dawladda Puntland ee Soomaaliyeed kuwaasoo dammaanad-qaadaya xuquuqaha kala ah: xaqa nolosha, nebedgalyada iyo bad qabka jireed (qodobka 18aad), xaqa u sinnaanta sharciga hortiisa , (qodobka 12aad) , xaqa caafimaad (qodobka 33aad) iyo amarka dastuuriga ah ee ku aaddan ilaalinta xuquuqda dumarka si waafaqsan shareecada Islaamka (qodobka 35aaad ) iyo xuquuqda Carruurta (qodobka 31aad) .

Iyada oo laga duulayo shuruucda caalamiga ah ee Soomaaliya qaybta katahay oo aan ka hor-imaanayn shareecada Islaamka, kuwaas oo ka dalbanaya dawladda Puntland maadaama ay qayb ka tahay dawladda federaalka Soomaliyeed in ay ciribtirto dhammaan noocayada kufsiga ..

Iyada oo la garwaaqsanayo in denbiyada kufsiga ee ka dhacaya dalku ay dhibaato ku yihiin dadka, gaar ahaan kuwooda taagta daran, iyo iyadoo la garwaaqsanayo in xeer dhaqameedka iyo xeerarka ciqaabta Soomaaliyeed ay ku guul daraysteen in si wax ku ool ah ula tacaalaan arrimaha kufsiga ee dalka ka dhacaya,ayaa ujeedada xeerku tahay in loo suurtageliyo dhibbanayaasha lagula kaco kufsiga helidda ilaalin buuxda oo xeerku siiyo, iyada oo la xaqiijinayo tallaabooyin ka dalbanaya hay'adaha dawladda ee ay qusayso in ay si buuxda u hirgeliyaan qodobada xeerkan, xoojiyaana dadaalka Puntland ugu jirto ciribtirka kufsiga .

## CUTUBKA KOOWAAD: EREY-BIXIN

### Qodobka 1$^{aad}$
### Magaca Xeerka

**Xeerka Kufsiga**

### Qodobka 2$^{aad}$
### Erey-bixin

Haddii Tuduca (Jumlada) ay ku jiraan aanu micno kale siinayn, ereyada soo socda waxa ay yeelanayaan micnaha ku hor qoran —

**"Eedaysane** "waxaa loola jeedaa Qof lagu soo eedeeyay fal denbiyeed ku xusan xeerkan .

**"Carruur"**waxaa loola jeedaa Qof kasta oo da'diisu ka yartahay 15 sano .

**"Dacwcad"** waxaa loola jeedaa oraah kasta oo qoraal ah ama hadal ah oo dacwooduhu usoo gudbiyo hay'adaha ku shaqada leh isagoo ka cabanaya in lagula kacay ama la isku dayay in lagula kaco fal denbiyeed ku cad xeerkan .

**"Goob wax lagu xiro"** waxaa ka mida ah xaruumaha buuliiska iyo xabsiyada.

**"Naafanimo"** waxaa loola jeedaa laxaad la'aan la xiriirta jirka, dareenka, nafsadda ama maskaxda, oo muddo dheer raad ku leh awoodda waxqabad ee Qofka.

**"Kufsi"** waxaa loola jeedaa Qof kasta oo Qof kale uga Galmooda xubinta taranka ama Dabada ama afka iyadoo aanu Qofka loo Galmoonayaa raalli ka ahayn (si khasab ah).

**"Xiraabo (Burcadnimo-kufsi)" waxaa loola jeedaa** : xad gudub kasta oo jinsi oo u dhaca si khasab ah kaas oo ay caddeeyeen ugu yaraan labo Nin oo markhaati ah ama uu qirtay eedaysanuhu.

**"Kufsi kooxeed"** waxaa loola jeedaa koox ka kooban laba Qof ama ka badan oo wadajir ugala ama wadar ahaan u abaabula ama isku daya fal-danbiyeedka kufsiga.

**"Xubinta taranka "** waxaa loola jeedaa xubinta taranka ee Qofka sida; Guska ama Siilka.

**"HIV"**waxaa loola jeedaa fayraska la dagaallama difaaca jirka.

**"Dhibbanaha"**waxaa loola jeedaa "Dhibbanaha" ku qeexan Qodobka 14aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (1963).

**"Sarkhaansan"** waxaa loola jeedaa xaaladda Qofka marka khamriga uu cabbo ama maandooriye uu isticmaalo, ama wax kale oo saameyn ku yeesha dhimirkiisa.

**"Wasaaradda"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Caddaaladda , Arrimaha Diinta iyo Dhaqan celinta ee Dawladda Puntland ee Soomaliyeed.

**"Qof haya jago awoodeed oo lagu aaminay"** waxaa laga wadaa sargaal dawladeed ama Qof kasta oo shaqaale dawladeed ah, ama dhakhtar, kalkaaliye, ama Qof kasta oo ka shaqeeya daryeel caafimaad, mid bini-aadnimo, mid la talin, ama Qof walba oo shaqaale bulsho ah, sida maamule Dugsi, Macallin ama shaqaale kasta oo ka hawlgala goob waxbarasho, ama ka tirsan qoyska, ama ah masuulka ilmaha ama qaraabo, ama Qof guriga ka shaqeeya iyo shaqaale kasta oo lagu aaminay masuuliyad ah in uu xannaaneeyo ilma yar ama Qof Naafo ah.

**"Booliiska "**waxaa loola jeedaa "ciidanka ammaanka gudaha" sida ku xusan qodobka 23(1) ee Habka Xeerka Ciqaabta Soomaliyeed (1963).

**"Sargaal Booliis"** waxaa laga wadaa "Sargaal ciidamada ammaanka gudaha" sida ku xusan qodobkaas 23(2) (b) ee Habka Xeerka Ciqaabta Somaaliyeed .

**"Xarun Booliis"** waxaa laga wadaa "Xarun ay leeyihiin ama adeegsadaan ciidamada ammaanka gudaha" sida ku xusan qodobka 23(2) (a) ee xeerka Ciqaabta Soomaliyeed (1963).

**"Muuqaallada fuxshiga ah"** waxaa loola jeedaa matalaad kasta, faafin qoraal ah, ama sawir muuqda, oo ay ku jiraan; sawir kasta, filim, fiidiyow, masawir, ama kambiyuutar ama muuqaal ama sawir lagu unkay kumbuyuutar, ha ahaado mid la sameeyey ama lagu soo saaray qaab Elektaroonig ah, si farsamaysan, ama siyaabo kale, oo si dhab ah umuujinaya cawrada Qofka, fal Galmo oo la samaynayo ama hordhac fal Galmo.

**"ka ganacsi Galmo" Waxaa loola jeedaa** Galmo kasta oo sharci darro ah oo loo fuliyo qaab ka ganacsi ah laguna fuliyo goobo u gaar ah.

**"Addoonsi Galmo (kufsi)"** waxaa laga wadaa qaab kasta oo Qof loogu adoonsado galmo sida in Qofka arrimihiisa u gaarka xannibaad lagu soo rogo, xorriyaddiisa dhaq-dhaqaaq oo la xayiro iyo awoodda uu u leeyahay in uu ikhtiyaar u yeesho arrimihiisa Galmo ee sharciga ah oo laga qaado.

**"Ku raad-joogid ama wiidayn "** waxaa loola jeedaa in Qofka loo daba socdo ama loogu kuurgalo si joogto ah ama ku lug lahaansho cabsigelin loola jeedo, oo Qofka ku dhalineysa inuu u cabsado naftiisa.

**"Handadaad"** waxaa loola jeedaa af ka hadal ama qoraal uu Qofka sameynayo ujeeddadiisu tahay inuu si sharci-darro ah Qof kale u gaarsiiyo xanuun, dhaawac, khasaaro ama qaado fal uu ku colaadinayo Qof kale.

**"Qof nugul"** waxaa loola jeedaa Qof kasta oo ay suuragal tahay in fal denbiyeed jinsi ah lagu sameeyo sabab la xiriirta da'diisa, qabiilkooda, diintooda, fikirkooda siyaasadeed, maqaamkooda bulsho, dhaqaale ama wax kale oo maqaam ah, oo ay ku jiraan Carruurta, waayeel, Naafo, barakace, Qof aan dal lahayn, ama qaxooti ah.

**"Hub"**waxaa loola jeedaa shey loogu tala galay ama loo isticmaalo in lagu geysto dhib, dhaawac ama in wax lagu dilo.

## Qodobka 3$^{aad}$
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeedooyinka Xeerkan waxaa ka mid ah Arrimahan soo socda:

(1) In la dajiyo xeer waafaqsan ama la jaan qaadi kara ujeeddooyinka guud ee Shareecada Islaamka , Dastuurka, Baaqyada Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya qaybta ka tahay iyo mabaadiida guud ee cadaaladda oo ku haboon waxna ka tari kara in la mamnuuco lagana hortago xadgudubyada iyo Faldanbiyeedyada kufsiga.
(2) In la xaqiijiyo in dhibanayaasha Kufsiga iyo fal denbiyeedyada kale ee jinsiga, iyo waliba markhaatiyadoodu helaan ilaalinta ay ubaahan yihiin.
(3) In la helo xeerar sahlaya ka hortegidda iyo baabi'inta denbiyada Kufsiga, noqdaana kuwa la isku hallayn karo, waafaqsanna xuquuqaha iyo xorriyaadka Dastuuriga ah ee Dhibbanaha iyo eedeysanaha.
(4) In sharciga lagu ilaasho, loona daryeelo bulshada qaybteeda nugul ee ay kamid yihiin Haweenka, Carruurta iyo Naafada.
(5) In la dajiyo nidaam xaqiijin kara ilaalinta xuquuqda dhibbanayaasha fal denbiyeedyada Kufsiga iyo kuwa kale ee Jinsiga sida xaqa xurmeynta nolosha gaar ahaaneed, xaqa dacwadda iyo isdifaaca iyo xaqa in la siiyo magdhaw.
(6) In dawladdu awood u yeelan karto aqoonsashada iyo dabo galista eedaysanayaasha gala kufsi.

## Qodobka 4aad

## Macnaha Ogolaanshaha iyo khasabka

(1) Qofka waxaa laga soo qaadayaa mid lagu khasbay Galmada haddii xaaladaha hoos ku qoran uu ku sugan yahay:

(b) marka aanu qaan gaar ahayn ;

(t) Qofka markii uusan awoodin inuu garto nuxurka aasaasiga ah ee laga leeyahay falka Galmada ;

(j) Qofka haddii si aan iskii ahayn loo sarkhaamiyo;

(x) haddii Qofka uu hurdo ama uu suuxsan yahay;

(kh) haddii Qofka lagu khasbo falka galmada iyadoo loo gaystay jirdil naftiisa ama qof gacalkiisa ah.

(d) haddii Qofka uu aqbalo falka Galmada, cagajuglayn ama handadaad kadib isagoo ka baqaya in uu waajaho khatarta ah in loo gaysto dhaawac, ama Dil, uu si wayn u aaminsan yahay in laga dhabaynayo.

(r) Haddii qofka lagu khasbo falka galmada isagoo ku jira goob xabsi ah.

(2) Marka la go'aaminaayo dacwadda kufsiga , maxkamadu waa in aanay tixgalin waxyaabaha soo socda:–

(b) Qofku in aanu iska cabin samayn ;

(t) Qofka in aanu dhaawac soo gaarin;

(j) Marka ay maxkamaddu qaadaneyso go'aanka la xiriira inuu eedeysanuhu caqliyan rumeysnaa in Qofka kale uu ka oggolaaday falka, waxaa loo baahan yahay inay tixgeliso dhammaan duruufaha la xiriira dhacdada, kuwaasoo ay ku jiraan dhammaan wixii tallaabooyin ah oo eedeysanuhu qaaday si uu hubanti uga dhigo inuu Qofku oggolaaday falka.

(x) Waxaa dhici karta inay maxkamaddu tixgeliso habdhaqanka u gaarka ah eedeysanaha marka ay qaadaneyso go'aanada la xiriira in Qofka eedeysanaha ahi uu haysto sababo macquul ah oo la xiriira inuu Qofka kale ka helay oggolaansho, gaar ahaan marka uu falku la xiriiro qof carruur ah ama naafo ah.

(kh) Haddii Qofka eedeysanaha ahi uu inkiro ama diido inuu galay faldambiyeedka kufsiga, iyadoo aan lahayn caddaymaha ku qeexan qodobka (27aad) ee xeerkan dhibbanaha ayaa laga rabaa inuu keeno caddayn uu ku sugayo dacwadiisa.

d) Haddii uu eedeysanuhu doodo inuu dhibbanuhu raalli ka ahaa faldambiyeedka, oggolaanshana ka helay dhibbanaha; eedeysanuhu isaga ayaa dusha u ridanaya mas'uuliyadda xaqiijinta sheegashadiisa.

## Qodobka 5aad

## Takoor La'aan

(1) Qodobada lagu xusay sharcigan, gaar ahaan tallaabooyinka loogu tala galay in lagu dhowro isla mar ahaantaana sare loogu qaado xuquuqda Qofka dhibka loo geystay ama markhaatiga, kuwaasoo uu ku jiro Qof carruur ah ama Naafo ah, waxaa loo baahan yahay in loo hirgeliyo iyadoo aan la isu hayb soocaynin qabiil, isir, midab, diin, waxyaabo la aaminsan yahay, da'da Qofka, xaaladda qoyska, dhaqan, luuqad, jinsiyada ama asalka mujtamaca, wadaniyada, jinsiga labood/dheddigga, siyaasad ama fikir kale, hanti, dhalasho, sharciga degganaanshaha ee Qofka, in Qofka ay dhibaatadu soo gaartay uu yahay Qof lasoo tahriibiyey ama Qof ka qayb-qaatay shaqooyinka ganacsiga jinsiga/Galmada ama xaalad kale;

(2) Waxaa loo baahan yahay in Qofka Carruurta ah ee ka badbaadey falka Galmada loola dhaqmo si caddaalad sinnaan ah iyadoo aan marna loo fiirineynin waalidiintiisa ama daryeelayaasha qabiilkooda, isirkooda, midabkooda, diintooda, waxyaabaha ay aaminsan yihiin, da'dooda, xaaladda qoyska, dhaqanka, luuqadda, asalka jinsiyadeed ama mujtamaca, jinisyadda dhalashada, jinsiga labood/dheddiga, siyaasad ama fikir kale, xaalad naafanimo, hanti, dhalasho, sharciga degganaanshaha ee uu Qofku leeyahay, inuu yahay Qof lasoo tahriibiyey, ama uu ka qayb-qaatay ka ganacsiga Galmada, ama xaalad kale.

## CUTUBKA LABAAD—DENBIYADA GALMADA

### Qodobka 6aad

### Kufsi

1- Qof kasta oo si ula-kac ah u geliya xubintiisa taranka heerkay doonto gelintu ha ahaatee Farjiga, Dabada, ama Afka, Qof kale si khasab ah waxaa loo aqoonsanayaa kufsi waxaana lagu xukumayaa axkaamta ku qeexan qodobka 29 aad ee xeerkan, Marka lala akhriyo Qodobka 27-aad ee Xeerkan.

2- Axkaamta ku xusan faqrada 1aad laguma dabbaqayo galinta walax aan ahayn xubnaha taranka oo loo sameeyay ujeeddo caafimaad ama baaritaan danbi.

3- U guurinta Dhibbanaha dumarka ah denbiilaha kufsaday waa in aanu noqon qiil loo adeegsado in eedaymaha ku xusan xeerkan looga baajiyo kusoo oogista denbiga.

4- Magdhaw siinta Dhibbanaha ma noqon karo mid meesha ka saarta denbiga ama ciqaabta xeerkani qabo.

5- Qof kasta oo isku daya gelidda denbiga ku xusan faqradda (1aad) marka lagu helo waxa uu mudanayaa xabsi gaaraya saddex sano ilaa shan sano.

6- Qodobkaan laguma qaadi karo labada Qof ee xalaasha isku qaba.

7- Haddii ay caddaato in labada qof ay si sharci darro ah raalli isaga ahaayeen falka galmada waxa laga soo qaadayaa fal denbiyeed galmo oo Zina ah taas oo lagu xukumayo xuduudda Alle u jideeyay ee ku xusan Shareecada Islaamka.

### Qodobka 7aad

### Kufsi Kooxeed

(1) Qofka wuxuu noqonayaa mid galay fal denbiyeed kufsi kooxeed ah haddii,uu qeyb ka yahay koox si wadajir ah kufsi ugu sameysay Qof kale.
(2) Qofkii lagu helo inuu ka qayb-qaatay fal-dembiyeed kufsi-kooxeed ah ee ku xusan faqradda (1), wuxa uu mutaysanayaa xeer-ciqaabeedka ku xusan qodobka (29-aad) ee xeerkan.
(3) Qofkii lagu helo inuu isku dayay kufsi kooxeed ama ka qayb-qaadashada fal-denbiyeed kufsi-kooxeed ah, waxa uu mutaysanayaa xarig u dhexaaya saddex sano ilaa iyo toban sano haddii heerka ka qaybgalkiisu aanu gaarsiisnayn Galmo iyadoon waxba laga soo qaadayn heerka kaalinta uu ka qaatay fal-denbiyeedka.

## Qodobka 8aad

## Daandaansi Galmo

Qof kasta oo ay ujeeddadiisu tahay kicinta ama qancinta dareenkiisa jinsi ama dareenka jinsi ee Qof kale, wuxuu galayaa fal denbiyeedka daandaansiga galmo haddii uu si ula kac ah —

1. u fara fareeya jirka Qofkaasi si khasab ah ama Qof kale oo aan awoodin iska caabbin ugu qasba Qof kale in uu fara fareeyo.
2. Waxa uu galay denbiga daandaansi galmo, waxaana uu mutaysanayaa xarig ciqaabtiisu tahay hal sano ilaa saddex sano.
3. Ujeeddada Qodobkan si loo dabaqo, ereyga "faro farayn" waxa loola jeedaa in Qof uu dhunkado, isku dhajiyo, isku xoqo , salaaxo, taataabto, ama tuutuujiyo qof kale jirkiisa.
4. Qofka isku daya in uu galo fal dembiyeedka qodobkan ku xusan, waxa uu mutaysanayaa xarig ciqaabeed u dhaxeeya lix bilood ilaa hal sano.

## Qodobka 9aad
## Ku khasbid Galmo Qof kale

(1) Qofka wuxuu noqonayaa mid galay Faldanbiyeedka ku khasbid Galmo, hadii uu ku Khasbo Qof kale gelidda Galmo Sharci darro ah (Sida inuu qof kale ku khasbo inuu u galmoodo qof saddexaad).

(2) Haddii Qof lagu helo fal-denbiyeedka ku qeexan qodobkan isaga ayaa mas'uul ka ah falkaas, wuxuuna ku muteysanayaa Xarig dhan: Shan Sano ilaa Toban Sano.

(3) Haddii lagu helo Qofka isku dayga fal danbiyeedka ku qeexan qodobkan, waxaa lagu xukumayaa xarig udhexeeya hal sano ilaa saddex sano .

## Qodobka 10aad
## Ka Ganacsi iyo addoonsi Galmo

(1) Qof kasta waxa uu galayaa fal denbiyeedka ka Ganacsi Galmo haddii uu si ula kac ah Qof Muqdar ah:

(b) Sabab ugu noqdo, uga ganacsado, ama usoo geliyo Puntland isagoo ka leh ujeedo ah in Qofkaas ku lug yeesho ka ganacsi Galmo

(t) U maal-geliyo, u maamulo, u kireeyo goob looga gol leeyahay in lagu sameeyo ka ganacsi Galmo.

(j) uga faa'iideysto ama uga macaasho dhaqaale ahaan.

(2) Qof kasta waxa uu galayaa fal denbiyeedka ka addoonsi Galmo haddii uu si ula kac ah, Qof Nugul ama Qof aan lahayn awood uu isku difaaco, ugaga faa'iidaysto xaaladdiisa nugayl, ama awoodeed ka ganacsi Galmo.

(3) Qofkii lagu helo fal-denbiyeedka ku xusan faqarada (1aad) waa in lagu xukumaa xabsi gaaraya toddoba Sano ilaa toban Sano.

(4) fal-denbiyeedka ku xusan qodobkaan Faqradiisa Labaad Qofkii lagu helo, waxaa lagu xukumayaa xabsi gaaraya Toban sano ilaa Shan iyo Toban sano.

(5) Qofkii isku daya inuu galo fal-denbiyeedka ku qeexan qodobkan Faqradiisa Koowaad waxa uu mutaysanayaa xarig gaaraya Laba Sano ilaa Saddex Sano.

(6) Qofka isku daya in uu galo fal dembiyeedka qodobkan ku xusan, waxa uu mutaysanayaa xarig ciqaabeed u dhaxeeya lix bilood ilaa hal sanno

## Qodobka 11aad
## Cadaadis Galmo

(1) Qofku wuxuu galayaa fal denbiyeedka Cadaadis Galmo, haddii uu si ula kac ah u sameeyo —

I. Dalbashada arrimo Galmo oo aan Sharci ahayn haddii ay ahaan lahayd mid hadal ah ama ficil ah oo Qofka lid ku ah.

II. Bixinta faallo Galmo la xiriirta oo Qofka laga bixiyo taas oo Qofku dhibsan karo.

III. Hadal ama ficil loogu muujinaya qofka inuu oofiyo waxyaabaha laga doonayo oo la xiriira fal galmo taasoo haddii uu diido uu waayayo wax qiimo leh oo la siin lahaa.

IV. Xodxodasho Galmo aan Sharci ahayn oo ku timaada taataabasho jir ahaaneed, isku dhejin iyo farriimo u diris aanu qofku raali ka ahayn.

V. Xodxodasho Galmo aan Sharci ahayn oo ku timaada taataabasho jir ahaaneed, dabagal ama wiido, ......in la isku dhejiyo, in lagu meermereysto goobaha banaanka ama dhismaha u dhow ee Qofka kale deggan yahay, uu ka shaqeeyo ama goobta uu ku Ganacsado, wax ka barto ama goobta laga helayo.

VI. Xodxodasho Galmo aan Sharci ahayn oo ku timaada xiriir aanu raali ka ahayn oo lagula dhaqmayo Qofka kale, taasoo ay ku jirto; in Qofka kale loo diro telefoon si uu wadahadal u bilowdo, in farriin loo diro, faakis, Email, SMS ama hannaan kale oo farriimo ah kuwaasoo la geynayo goobta deegaanka, iskuulka, goobta shaqada goob gaar ah ama goob ay Dadweynuhu ku kulmaan.

VII. Anshax xumo jinsi ama dhaqdhaqaaq jirka oo loo aqoonsan karo xadgudub Jinsi , ha ahaato mid ereyo ama tilmaan ah taasoo keeni karta in Qofka kale dareen geliyo isagoo umaraya qaab aan Sharci ahayn.

(2) Qofkii gala fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa xarig muddadiisu aaney ka yareyn lix bilood kana badneyn hal Sano.

(3) Qofkii isku daya fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa xarig muddadiisu aaney ka yareyn hal Bil kana badneyn Labo bilood.

## Qodobka 12aad
## Isqaawin

(1) Qofku waxa uu galayaa fal denbiyeed isqaawin hadii uu si ulakac ah ugusoo bandhigo cawradiisa/cawradeeda goob fagaare ah isagoo miyirkiisa qaba, aanna qasbanayn.
(2) Qofkii gala fal-denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxa uu mutaysanayaa xabsi gaaraya lix bilood ilaa labo Sano.

## Qodobka 13aad
## Afduubka Ujeeddo Kufsi

(1) Qofka wuxuu galayaa fal denbiyeedka Afduub ujeeddo kufsi haddii uu si ulakac ah u qafaasho ama meel ugu haysto Qof kale isagoo ujeeddadiisu tahay inuu la yeesho fal Galmo, balse Falkii Galmo uusan dhammaystirmin.
(2) Qofkii gala fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa xarig muddadiisu tahay Shan ilaa toban sano.
(3) Qofkii isku daya fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa xabsi gaaraya saddex Sano ilaaShan Sano.

## Qodobka 14aad
## Soo saarista ,iibinta iyo Baahinta Muuqaallada Anshax-xumada ah

(1) Qofku wuxuu galayaa denbiga soo saarida , iibinta ama qaybinta walxo anshax xuma ah haddii uu —
(b) Si ulakac ah u soo saaro, iibiyo, Daabaco, ugu Sawiro Goob Fagaare ah, uga baahiyo Qalab Warbaahineed TV, ama Video, IWM, Muuqaalo anshax xumo ah.
(t) Si ulakac ah u qasbo, ku qalqaaliyo, isku dubarido, abaabulo, ama sababo in Qof ku lug yeesho arrimo la xiriira soo saarista, iibinta iyo qaybinta muuqaallo anshax xumo.
(j) Yahay agaasime, sawir qaade, filim qaade, ama nooc kasta oo kale oo shaqaale ah, kuwaas oo si ulakac ah, ugu lug yeeshay soo saarista , iibinta ama baahinta filimada anshax xumada ah.
(x) Si ulakac ah, uga faa'iideysta ama uga helo faa'iido lacageed, bulshadeed, siyaasadeed;
(2) Qofkii gala denbiga qodobkaan ku xusan waxaa lagu xukumayaa xarig gaaraya laba Sano ilaa Shan Sano .
(3) Marka la hirgelinayo qodobkaan, waa in la eegaa haddii muqaalka fuxshigu uu Qofka laga faafiyay dhib u gaysanayo iyo in kale.
(4) Qofka isku daya denbiga qodobkaan ku xusan waxaa lagu xukumayaaa xarig gaaraya Saddex bilood ilaa hal Sano.

## Qodobka 15aad
## Daroogayn ula kac ah

(1) Qofka wuxuu galayaa fal denbiyeedka abaabulid, Qarin, Cabsiin, ku Durid, walax maan-dooriye ah uu ku qasbay haddii—

(b) Si kas ah isugu dubarido ficil kasta oo keenaya inuu Qofku qaato ama isticmaalo, Iyadoo Qofkaasi oggolayn;

(t) Uu yahay Qof aan Muqdar ahayn, qaab kasta oo loo siiyo;

(j) La sarkhaamiyo si ay u suurto gasho laftooda ama cid kale inay la yeeshaan fal Galmo ah
Qofka la daroogeeyey.

(2) Qofkii gala fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa xarig gaaraya Labo Sano ilaa shan Sano.

(3) Hadii Daroogayntaasi ku keento Dhibbanaha, Waalli, ama dhimanaan joogto ah waxaa lagu xukumayaa, Shan Sano ilaa Toban Sano iyadoo loo raacinayo magdhaowga ay shareecadu ka xukuntay hadba khasaaraha inta uu la'eg yahay.

(4) Qofkii isku daya fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa xarig gaaraya Lix Bilood ilaa hal Sano.

## Qodobka 16aad
## Qof u sixrid ujeeddo kufsi

1) Qofku wuxuu galayaa faldambiyeedka qof u sixrid ujeeddo kufsi haddii uu si ulakac ah—

(b) Qof kale ugu adeegsada sixir sida, indhasarcaadin, falaanfulid, Ma diiddayn awoodo qarsoon oo sababa in qofku xiskiisa, wacyigiisa ama miyirkiisu is bedelo sidaana ugu sameeya galmo aan sharci ahayn si ikhtiyaarkiisa/ikhtiyaarkeeda ka baxsan.

2) Qofkii uu ku caddaado fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan waxaa lagu xukumayaa sida shareecadu ka qabto faldambiyeedkan.

3) Hadii sixriddaasi ku keento Dhibbanaha, Waalli, ama dhimanaan joogto ah waxaa lagu xukumayaa, wixii shareecadu ku xukunto iyadoo loo raacinayo magdhawga ay shareecadu ka xukuntay hadba khasaaraha inta uu la'eg yahay.

4) Qofkii isku daya fal denbiyeedka ku xusan qodobkaan asii aan fulin waxaa lagu xukumayaa xarig ugu yaraan 10 sano ugu badnaan 15 Sano.

## CUTUBKA SADDEXAAD

## BAARISTA DANBIYADA LAXIRIIRA KUFSIGA

### Qodobka 17aad

### Xeraynta Dacwadda

(1) Dacwadda ku saabsan denbiga kufsiga waxaa loo soo gudbinayaa si waafaqsan xeerka.
(2) Ma jiro Qodob xaddidaya in la gudbiyo cabasho ku saabsan kufsi ku xusan xeerkan .
(3) Warbixin ama Dacwad kasta ku saabasan kufsiga dib looma dhigi karo hadii aan loo helin cudurdaar Sharci ah, sida baaris, lwm.
(4) Dhibbanaha soo gudbiya dacwad kufsi haddii ay caddaato in uu ka been sheegay dacwadda maxkamadda ayaa go'aan ka gaaraysa ciqaabta uu mudan yahay.
(5) Dhibbanaha waqti kasta kadib mudadda la galay danbiga wuxuu weydiisan karaa cisbitaal kasta ama xarun kasta oo caafimaad in ay u sameeyaan daryeel caafimaad haddii uu tixraac rasmi ah ka haysto ama aanu ka haysanba Booliiska ama Hay'ad Dawladeed oo kale.
(6) Dhibbanuhu wuxuu ka keensan karaa Booliiska ama Hay'ad kasta oo kale oo ay qusayso warbixin caafimaad ama mid xaaladdiisa nafsi ku saabsan oo faahfaahin ka bixinaysa dhaawacyada ka soo gaaray Dhibbanaha danbiga kufsiga, laakiin waayitaanka warbixintaas waa in aanay noqon mid sababta inaan Hay'adaha ku shaqada leh bilaabin baarista danbigaas .
(7) Macallin, xirfadle caafimaad, hawl-wadeenno caafimaad, samafalayaal ,ama hawl-wadeen bulsho, waxa waajib ku ah inay ku wargaliyaan saldhigga Booliska, haddii ay hayaan Qof si caqli-gal ah ay uga shakiyaan in ilmo carruur ah ama Qof Naafo ahi yahay dhibbane danbi kufsi .
(8) Waxaa waajibka ku qoran faqrada (7aad) uu fulayaa haddii soo gudbinta danbigu ka turjumayso danta Dhibbanaha.
(9) Waalid ama ilaaliye sharci waxaa waajib ku ah inuu u gudbiyo warbixin saldhigga Booliska, haddii uu si macquul ah uga shakiyo in ilmo carruur ah ama Qof Naafo ah uu yahay dhibbane.

Waajibaadka ku qoran faqrada (9aad0 haddii ay dhacdo in ay soo sheegi waayaan waxay arrintaasi sababi kartaa in lagu helo ka gaabin xil-gudasho (omission).

## Qodobka 18aad
## Waajibaadka Saraakiisha Booliiska

(1) Si loo hirgeliyo qodobbada Xeerkan, waa in saldhig kasta ee booliis oo la dhiso laga yagleelaa qayb si gaar ah ugu takhasusta Danbiyada kufsiga si ay u baaraan. Qaybta takhasuskaas leh waxaa loo shaqaaleynayaa saraakiil joogta miiska Dacwadda lagu diiwaangesho, Saraakiil booliis oo ka jawaaba warbixnta danbiga iyo saraakiil iyagu baaritaan ku sameeya denbiga.

(2) Marka ay soo gaarto Dacwad, sarkaalka Booliiska ah waxa ku waajib ah inuu—

(b) Si deg deg ah uga jawaabo warbixinta dambiga kufsiga, iyo in uu u fidiyo gargaar deg-deg ah iyo badbaadin dhibbanaha;

(t) Isla markiiba kala saaro edeysanaha iyo dhibbanaha, eedeysanahana geeyo saldhigga Booliiska ugu dhow si su'aalo loo weydiiyo;

(j) Islamarkiiba siiyo dhibbanaha gaadiid uu ku gaaroo xarunta ugu dhow ee leh daryeel caafimaad;

(x) Aqoonsado oo xafido hub kasta oo Gacanta soo gala, si loo ilaaliyo dhammaan dadka goobta jooga;

(kh) Ku wargeliyo kuwa adeegyada bulshada bixiya, haddii dhibbannuhu yahay carruur ama Naafo ama qof kale oo nugul.

(d) Qariyo heybta dhibbanaha iyo markhaati kasta oo qarsoon ha codsadaan qarsoonidaa ama yaaney codsan ha ahaado dhibbanaha ama markhaatiga,

(r) sugo ammaanka goobta danbiga hubiyana caddeyn kasta in aan la halleyn (ama la baabi'in);

(s) xaqiijiyo dhacdooyinka hore, si loo ogaado danbiga la galay;

(sh) Kala taliyo dhinacyada ay khusaysay xuquuqahooda',

(dh) Lagula yeesho waraysi bilow ah dhinacyada ay khusayso, Qariino kasta, oo ay ku jiraan carruur, luqad ay iyagu fahmaayaan iyo qolal kala gaar ah midba midka kale si loo xaqiijiyo fursad ay si xor ah ugu hadlaan;

(c) Qoraal ku diwaan geliyo caddeymaha hore ee bilowga ah;

(g) Ku qoro qoraal rasmi ah baaritaannada bilowga ah, caddayn, warbixinnada iyo in uu u gudbiyo sarkaal qaabilsan baarista.

(f) Suurageliyo helitaanka nuqul ka mid ah warbixinta hore ama bilowga ah ee Qofka cabanaaya ama wakiilka uu sida sharciga waafaqsan u idmaday.

(3) Waxaa reebban in askariga booliska ah ama sarkaal kasta ee dowladeed uu si caam ah ugu baahiyo dadweynaha ama ugu shaaciyo warbaahinta haybta dhibbanaha ama markhaati kasta iyadoo aan laga helin oggolaansho qoraal ah dhibbanaha ama markhaatiyada.

(4) Inta aanu bilaabin baaritaanka, sarkaalka baarista waxaa waajib ku ah inuu:

(b) ku sameeyo baaritaan aad u ballaaran goobta dambiga;
(t) Ka qaado wareysi qoto dheer dhibbanaha iyo markhaati kasta isagoo adeegsanaya
hab ama luuqad ay markaas fahmayaan;
(j) Ka qayb geliyo kuwa ah adeeg bixiyayaasha bulshada haddii dhibbnnahu yahay ilmo
yar, Qof Naafo ah ama Qof Nugul;
(x) Sugo ammaanka dacwoodaha iyo markhaati kasta.
(kh) Qaado dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee loogu tala galay ujeeddooyinka
baaritaanka, iyo gaar ahaan inay hubiyaan in dhammaan Dariiqooyinka macquulka ah ee baaritanka lagu dabo joogo.
(d) Su'aalo weydiiyo eedeysanaha diiwaangeliyona eedaysanaha caddeymihiisa.
(r) ka faa'iidaysto dhammaan qalabka baaritaanka.
(s) Ururiyo, kaydiyo, joogteeyana nooc kasta oo caddeyn ah oo laga helay goobta denbigu ka dhacay ama meel kale.
(sh) Ku dhammeeyo baaritaanka wakhtiga loo qoondeeyay;
(dh) Ku qoro baaritaanada, caddaymaha, warbixinada qoraallada rasmiga ah oo u diro
sarkaal qaabilsan baarista.
(c) Weydiisto talo hordhac ah bilowga baaritaanka halkii suurto-gal ah xafiiska Xeer Ilaalinta.
(g) U diro xafiiska Xeer-ilaaalinta waqtiga loo qoondeeyay warbixin rasmi ah oo si qoto dheer u faahfaahsan ee Dacwadda;
(f) Siiyo cadaymaha ama waxyaaba kale ee looga baahan yahay xafiiska xeer ilaalinta.

5- Soo ururinta iyo kaydinta caddaymaha lagu helay adeegsiga qalabka casriga ah sida Faraha, dheecanada IWM, waa in la kaydiyaa si loogu adeegsado caddaynta maxkamadda horteeda ah iyo si mar labaad loogu adeegsan karo hadii uu dib dambe u galo dambi ka mid ah danbiyada ku xusan xeerka.

## Qodobka 19aad
## Waajibaadka xafiiska Xeer-Ilaalinta

(1) Go'aanka ah in la soo oogo danbi kufsi ama danbi kale oo la xiriira si waafaqsan qodobada Xeerkan waxaa samayn kara Xafiiska Xeer-ilaalinta.
(2) Si loo hir-geliyo qodobada xeerkan, mas'uuliyiinta xeer-ilaalintu waxay dhisayaan qaybo takhasus gaar ah u leh oogidda dacwadaha la xiriira dambiyada kufsiga.
(3) Dhammaan mas'uuliyiinta Xafiiska xeer ilaalintu heerarka ugu muhimsan ee oogitaanka hababka sharci ee Dacwadda danbiga kufsi waxaa waajib ku ah in Qofka dhibbanaha ah ay ku wargeliyaan xaaladda kiiska iyagoo adeegsanaya luuqad uu fahmi karo sida:
(b) Xuquuqdooda iyo Faahfaahinta nidaamka sharciga ah ee khuseeya.
(t) Adeegyada la heli karo, hababka taageerada iyo tallaabooyinka ilaalinta;

(j) Soo celinta xuquuqdooda iyo magdhawga;

(x) Faahfaahinta dhacdooyinka la xiriira dacwadooda, kuwaasoo ay ku jiraan goobaha iyo xilliyada gaarka ah ee la dhageysanayo in Qofka eedeysanaha ah laga
siideynayo xarigga hordhaca ah ama xabsiga.

(kh) Natiijada dacwadda xeer ilaalintu, ee ay ku jiraan xukunka, ciqaabaha haddii uu jiro Qof la magdhabay, Haddii dacwadda la joojiyo oo loogu sharraxo dhibbannaha sababaha kiiska loo joojiyey qoraal ahaan.

4- Inta lagu jiro dhammaan marxaladaha kala duwan ee dacwadda, Masuuliyiinta xeer-ilaalintu waa in ay mamnuucaan tallaabo kasta oo uu sameeyo Oday dhaqameed, Qof madax ah am cid kale oo kasta si loogu xalliyo dambi ka mid ah danbiyada kufsiga ee ku xusan xeerkan.

## Qodobka 20aad
## Gudasho La'aan Baaris Fal Danbiyeed Kufsi

Sarkaalka Booliiska ah ama xeer-ilaaliye ee gudan waaya ama daahiya gudashada waajibaad saaran oo ku cad Qodobada 18 iyo 19 ee Xeer kan ee kalifa in lawaayo ama ay lunto caddeyn la heli lahaa haddii uu waajibkiisa u gudan lahaa si xilkasnimo ahi, waxa uu mutaysan doonaa anshax marin waafaqsan nidaamka anshaxmarineed ee u degsan xafiiska uu ka tirsan yahay iyo ciqaabta ku haboon sida uu dhigayo Xeerka Ciqaabta Guud.

## Qodobka 21aad
## Awaamiir Badbaadin iyo Ilaalin

(1) Marxalad kasta oo uu baaritaanka ama heerarka sharci ee garsoorku marayo, waa in ay maxkamaddu dammaanad qaaddaa in ay u samayso gargaar deg deg ah ama nooc kasta oo kale ee amar ilaalineed ah dadka soo socda —

b) Dacwoodaha;

t) Qoyska dacwoodaha, Qaraabadiisa soke, iyo dadka uu mas'uulka ka yahay;

j) Markhaatiga;

x) Dhakhtar caafimaad, ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee daryeelaya dhibbanaha;

Kh) wakiil sharci ama bixiyaha gargaarka sharciga ah oo wakiil ka ah dhibbannaha.

d) Hawl-wadeennada ama shaqaalaha bani'aadaminimo, la taliye, ama nooc kasta oo hawlwadeen bulsho ee siiya dhibbannaha taageero.

2. Awaamiir ilaalineed ayaa lagu tilmaami karaa xaaladaha gaarka ah ee mamnuucaya in eedeysanaha kula kaco hanjabaad, cabsi-gelin, ama khatar shakhsiyaadka ku xusan faqradda (1) ee qodobkaan Xaaladahaas waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn, awaamiirta ah—

b) in muddo afar iyo labaatan saacadood gudahood ah looga dhigo eedeysanaha wixii hub ah;
t) in eedeysanaha laga mamnuuco inuu la yeesho wax xiriir toos ah ama dadban dacwoodaha ama Qof kasta oo ka tirsan xubnaha qoyska ay khuseyso; iyo
j) In laga mamnuuco eedeysanaha in uu u soo jirsado masaafa dhow milkiyadda ama deegaanka dacwoodaha ama Qof kasta oo ka tirsan xubnaha qoyska ay khuseyso.

3. Dhageysiga dacwadda kaddib ama marka ay soo gabagabowdo dacwaddu maxkamaddu waxay soo saari kartaa awaamiir dammaanad qaada nabad-galyada iyo ammaanka dhibbane iyo markhaati kasta.
4. Waxaa reebban in lagu xad-gudbo awaamiirta dammaanad qaadka badbaadinta ee ay maxkammaddu bixisay si waafaqsan xeerkan.
5. Qof kasta oo lagu helo inuu ku xadgudbay sida ku cad qodobkan, waxaa lagu xukumayaa xarig gaaraya Hal Sano ilaa Saddex Sano.
6. Qof kasta oo isku daya inuu galo fal-denbiyeedka ku xusan qodobkan, waxa lagu xukumayaa xarig gaaraya Lix bilood ilaa Hal-sano.

## CUTUBKA AFRAAD: XUQUUQDA DHIBBANAHA IYO EEDAYSANAHA

### Qodobka 22aad
### Xuquuqda Daryeelka Caafimaad

(1) Dhibbanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu helo daryeel caafimaad, daawayn maskaxeed, niyad dhisid iyo in laga baaro cudurka aydhiska.
(2) Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo daawooyinka ka hortaga Cudurrada Galmada la isugu gudbiyo kadib marka uu dhaco falka kufsiga ee lagula kacay.
(3) Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado oo helo faah faahinta warbixinta baarista caafimaad iyo maskaxeed/niyadeed ee khusaysa dhaawaca soo gaaray, natiijada baarista caafimaad iyo daaweyntiisaba.

### Qodobka 23aad
### Kaalmada Sharci

Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo Qareen siiya adeegga sharci ee uu u baahan yahay haddii aanu Dhibbanuhu awoodin inuu isagu qabsado Qareen.

### Qodobka 24aad
### Bilaabista dacwad madani ah

(1) Qofka waxyeelladu soo gaartay wuxuu xaq u leeyahay in uu bilaabo dacwad madani ah oo uu ku dalbanayo magdhaw lacagadeed ama mid aan lacag ahayn oo laga siiyo waxyeelladii ka soo gaaray fal xeerkani uu u aqoonsanyahay in uu yahay mid dembi ah.
(2) Waa in xaqa Qofka waxyeelladu soo gaartay ee uu kusii wadayo dacwad madani

ah oo uu ku doonayo magdhaw lacageed ama mid aan lacag ahayn aysan wax saamayn ah ku yeelanayn jiritaanka ama go'aanka dacwadda ciqaabeed ee la xiriirta xeerkan loo cuskaday magdhawga.

(3) Xaaladda sharciga degganaanta ee Qofka waxyeelladu soo gaartay ama ku noqoshada wadankiisa hooyo ama ka maqnaanshihiisa uu ka maqanyahay meesha amarka maxkamaddu ka socdo, kama reebayso maxkamadda in ay amar magdhaw ah bixiso.

## Qodobka 25^aad
## Xuquuqda Ilaalinta Dhibbanaha iyo markhaatiga

(1) Dhibbanaha ama markhaatiga dacwadda la xiriirta kufsi waxa uu xaq u leeyahay asturidda haybtiisa ama aqoonsigiisa gaarka ah.

(2) Akhbaar lagu aqoonsanaayo dhibbannaha ama markhaatiga lama daabici karo iyadoo aan oggolaansho qoraaleed laga haysan dhibbanaha iyo markhaatiga.

(3) Maxkamadda iyo hay'adaha awoodda u leh, waxay heer kasta ay dacwaddu marayso soo saari karaan go'aano looga danleeyahay in lagu ilaaliyo oo looga hortago shaac-bixinta dhibbannaha ama aqoonsiga markhaatiga, waxaana tallaabooyinkaas ka mid ah:

b) In maxkamadu amarto kalfadhiyada dacwadda in lagu qaado meel qarsoodi ah oo laga ilaaliyo warbaahinta iyo dadweynaha;

t) Oggolaanshaha isticmaalka qalabka beddela muuqaalka ama codka Qofka. Iana mamnuuco adeegsiga kaamarooyinka wax sawira, waxna duuba inta maragfurka lagu jiro;

j) Ogolaanshaha caddeymaha dhibbanaha ama markhaatiga laga dhageysto fidiyoow la gujiyo (link), ama la adeegsado farsamamooyin kale ee isgaarsiisneed oo casri ah, ama shaashad gadaal laga mariyo muuqaalka eedaysanaha;

x) In si adag loo xafido dacwadda maxkamadda.

4. Haddii dhibbannaha ama markhaatiga uu yahay carruur, maxkamadda iyo hay'adaha ku habboon marxalad kasta oo ka mid ah heerka dacwadda, waa in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah si loo ilaaliyo, loogana hortago shaacinta aqoonsiga dhibbanaha ilmaha ah, si lamid ah sida uu dhigayo tallaabooyinka ku qoran qodobkaan farqadiisa (3) xarafka (b) ilaa (x)

## Qodobka 26aad

## Xuquuqda Eedaysanaha

(1) Eedeysanaha waxa uu leeyahay dhammaan xaquuqaha iyo xoriyaadka ku cad Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla ee uu leeyahay Qof kasta oo loo qabto fal dambiyeed.
(2) Eedaysanahu waxa uu xaq u leeyahay in uu qabsado Qareen ama Qareenno difaaca, haddii uusan awoodinna Dawladda ayay waajib ku tahay in ay siiso eedaysanahaasi Qareen lacag la'aan ah.
(3) Dawladda Puntland waa in ay qaaddo dhammaan tallaabooyinka ku habboon ee lagu xaqiijinayo ilaalinta iyo xushmeynta xaquuqaha Dastuuriga ah ee eedeysanaha.

# CUTUBKA SHANAAD
# CADDEYMAHA DACWADDA

## Qodobka 27aad
## Caddaymaha La Aqbali karo

(1) waxay u qaadan kartaa Maxkamaddu caddayn buuxda in fal danbiyeedka Kufsigu dhacay haddii :
   a) La helo Labo nin iyo ka badan markhaati oo buuxiyey shuruudaha markhaatiga ee ay xustay Shareecadu.
   b) La helo qiraal sax ah oo uu faldanbiyeedkan Kufsiga ku qirtay eedaysanuhu

(2) Cadaymaha ku xusan Faqrada "1" ee Qodobkan hadii aysan dhammaystirmin lana helo cadaymo kale oo tilmaamayaa dhicitaanka faldanbiyeed Kufsiga, waxay Maxkamaddu u cuskan kartaa ciqaabta eedaysanaha, ee ku xusan Qodobka 29-aad Faqaradiisa (4).
(3) Way bannaan tahay in warbixin dhakhtareed ama mid nafsiyadeed ay maxkamaddu caddayn ahaan u qaadato haddii fal damiyeedku yahay mid hoos yimaada xeerkan.
(4) In warbixin dhakhtareed lagu guul darraysto keenitaankeedu ma aha in taasi tahay in dacwaddu istaagayso ee wixii kale oo caddaymo ah yaa lagu sugi karaa danbiga.
(5) Warbixin dhakhtareed ama mid nafsiyadeed, marka aan ku jirno qodobkan, waa in ay ku jiraan faahfaahinta jir ahaaneed, midda nafsi ahaaneed, waxyeellooyinka maskaxeed iyo kuwa caadifadeed ee qofka waxyeelloobay, iyo wax allaale wixii warbixin khusaysa ah, laakiin khasab ma aha in warbixintu ay cayinto ama ay soo gunaanaddo in fal dambiyeed kufsi uu dhacay.
(6) Cisbataalka dawladda, ama mid gaar loo leeyahay, dhakhtarka cudurrada haweenka, kalkaaliyaha/kalkaalisada caafimaad ama qof kale oo caafimaadka

takhasus u leh ayaa loo oggol yahay in qofka waxyeelloobay ay warbixinta dhakhtarka siiyaan, boolis ha soo codsado warbixintaas ama yuusan soo codsane.

(7) Dhakhtar nafsiyadeed oo dawladda u shaqeeya ama si gaar ah u shaqaysta , la taliye ama qof kale oo shaqaale bulsheed ah, ayaa loo oggol yahay in ay siiyaan qofka waxyeellobay warbixin nafsiyadeed, Booliis ha soo codsado ama yuusan soo codsane.

(8) Mid ka mid ah cadaymaha baaritaanka loo adeegsado shaybaarka casriga ah (forensic) caddayn way u noqon kartaa dacwad u oogan in la galay fal dambiyeed hoos yimaadda xeerkan. Ku guul darraysiga keenitaanka caddayn ka timid baaritaan qoto dheer (forensic), macnaheedu ma aha dacwaddu way istaagaysaa.

(9) Qalab kasta, hub, ama shay la xiriira galitaanka fal denbiyeed hoos yimaada sharciyada qaanuunka, maxkamaddu caddayn way u qaadan kartaa, laakiin haddii lagu fashilmo keenitaanka caddayntaas, ma aha macnaheedu dacwaddu way joogsanaysaa.

(10) Wax kasta oo ah caddayn xoojin ah, maxkamaddu way u qaadan kartaa in uu caddayn yahay, laakiin keenitaan la'aanta cadayntaas, ma aha in dacwadda la joojinayo.

(11) Maxkamaddu wixii booliisku soo gudbiyo way u qaadan kartaa in uu caddayn noqdo, laakiin helitaan la'aanta taas ma aha macnaheedu in dacwaddu istaagayso.

## Qodobka 28aad
## Caddaymaha aan La Aqbali karin

(1) Ma banaana in la xigto taariikh-nololeedka jinsi ( sexual history or background) ee dhibbanaha fal denbi kufsi oo uu horay u galay, noqonna karta caddeyn loo addeegsado is difaac ama loogu andacoodo in :

(a) ay u muuqato in dhibbanuhu ogolaaday falka kufsi ama jinsi ee dacwaddu khusayso ; ama

(u) Marag kaca dhibanahu yahay mid aan la aamini karin ama daacad ahayn.

(b) Ma bannaana in uu eedeysanuhu ama cid kale oo mataleysa qofka ku eedaysan dacwadkufsi khusaysa sida ku cad Farqadda 1aad ee Qodobkaan ay caddeyn ahaan u soo bandhigto in uu dhibanahu la yeeshay ama horey uga ogolaaday eedeysanaha ama cid kale fal jinsi ah oo aan ahayn ka ay dacwadu khusayso.

## CUTUBKA LIXAAD

## CIQAABTA KUFSIGA

### Qodobka 29$^{aad}$
### Xaaladaha Cusleeya Ciqaabaha

(1) Qofkii ay ku caddaato gelitaanka Faldanbiyeedka Kufsigu sida ku cad Qod, 27aad Faqradiisa"1" wuxuu Qaadigu kala dooranayaa in uu ku xukumo mid ka mid ah Ciqaabahan shareecadu u dejisay xiraabada ama burcadnimada kufsiga ee ku xusan Suuratul-Maa'idah aayadda 33$^{aad}$.

(2) Dhammaan Faldanbiyeedyada Kufsiga ee aan buuxin Caddaymaha ku xusan Qodobka 27-aad, Faqradiisa "1" waxaa lagu qaadayaa Ciqaabta ku xusan Xeerkan.

(3) Marka lagu ciqaabayo Qof gelidda fal denbiyeed ku xusan Qodobkan haddii la helo mid ka mid ah xaaladaha soo socda, waxay maxkamadu ku ridi kartaa . eedaysanaha ciqaabta ugu sarraysa ee Qodobkan ku xusan haddii –

(a) Eedaysanaha oo dembiga galay isaga oo ay weheliyaan qof ama wax qof ka badan ;
(b) Eedaysanaha oo denbiga gala isagoo adeegsan handadaad ama hub;
(c) Eedeysanaha oo ah qof ku tagri falay ama si qaldan uga faa'iideystay maqaam xileed , mas'uuliyadeed ama aaminaadeed;
(d) Eedaysanaha oo danbiga kula kaca qof nugul, isagoo ka faa'iidaysanaya da'da, xanuunka, naafanimada, uurka, ama waqtiga iyo goobta qofka dhibanaha ah ku sugan yahay markaas taas oo ah xaalado uu og yahay danbiiluhu;
(e) Eedaysanaha oo denbiga kula kaca ilma carruur ah oo da'diisu ka yar tahay 15 sano ;
(f) Eedaysanaha oo denbiga gala isaga oo qaba cudurka Aydhiska yaanuba ogaan in cudurkaas uu qabay ;
(g) Eedaysanaha oo uureeya dhibbanaha ;
(h) Eedaysanaha oo markaas xaas ah;
(i) Eedaysanaha oo dhibanaha ku hor-kufsaday (xoogay) dad hortood si uu u bahdilo
(j) Eedaysanaha oo gala danbiga isagoo ka baxsanayay warqad soo qabasho ama xabsi oo isaga lagu soo saaray ;
(k) Eedaysanaha oo danbiga caadaystay ama dhawr jeer oo hore maxkamdi ku xukuntay isla fal dembiyeedka kufsiga;
(l) Eedaysanaha oo danbiga ku hor fuliya ilma yar oo 15 sano da'diisu ka yar tahay
(m) Eedaysanaha oo falkiisu sababay in dhibbanuhu waasho

(n) Eedaysanuhu uu fal noocaas oo kale ah uu horay kula kacay dhibbanahan

(o) Eedaysanaha oo fal denbiyeedkiisu sababay naafannimo joogto ah oo lasoo daristay dhibbanaha

(4) Ciqaabta danbiyada ku xusan xeerkaan waa la gaarsiin karaa ilaa dil hadii ay caddaato in :

(a) Eedaysanaha uu fal denbiyeedkiisu sababay dhimashada dhibbanaha;

(b) Eedaysanaha uu fal danbiyeedka kula kacay qof maxaarimtiisa ka mid ah.

(5) Faldanbiyeedka Kufsigu markii aysan u dhammaystirmin Cadaymiha ku xusan Qodobka 27-aad, Faqradiisa"1" isla mar ahaantaana la helo qaar ka mid ah Qariinooyinka xeerakani xusay ee tusinaya in uu dhacay Fal kufsi, waxaa eedaysanaha lagu xukumayaa Xabsi u dhaxeeya: Toban Sano ilaa Labaatan Sano.

## Qodobka 30[aad]:
## Caddeynta Qofka Dhibbanaha ah

(1) Si loo go'aamiyo xukunka lagu ridayo dembiilaha sida ku cad sharcigan, maxkamaddu waxay tixgalin siin kartaa caddeyn kasta oo af ama qoraal ah oo uu diyaariyey dhibbanaha uu ku faahfaahiyey dhibka gaaray isaga ama khasaarihii kasoo gaaray fal dambiyeedka.

(2) Warbixinta dhibbanuhu soo diyaariyey una gudbiyey maxkamadda si waafaqsan qodobkan, kama reebayso maxkamadda in ay tixgaliso caddeymo kale si loo gaaro go'aanka xukunka lagu ridayo dembiilaha

## Qodobka 31[aad]:
## Xukumidda Magdhowga

(1) Marka Maxkamaddu ku xukunto Eedaysanaha Ciqaabta uu ku xukumay Xeerkani, waa in dhibbanaha loo xukumo Magdhawga dhaawacii, khasaarahii ama dhibkii dembiiluhu u geystay dhibbanaha. Xukunka magdhawgaasna waxaa ku jiri kara bixinta:

(a) kharashka Daawada, Daweynta dhimireed iyo nafsiyadeed ee Dhibbanuhu u baahanyahay,

(b) kharashka daaweynta jirka iyo shaqaynta xubnihiisa iyo baxnaaninta Dhibbanuhu u baahan yahay.

(c) Kharashka Gaadiidka, ama hoyga ee Dhibbanuhu u baahanyahay,

(d) Lacagta ku baxda sharci-yaqaanka iyo kharashaadka la xiriira ee dhibanuha si macquul ah ugu baxday taasoo ku baxday diyaarinta iyo imaatinka fadhiyada dacwadda oo ay kujiraan hoyga iyo kharashka safarka,

(e) Wixii khasaare Hanti ah ee kale ee Dhibbanaha si toos ah ugaga yimi dhicitaanka fal denbiyeedka kaas oo qiimayntiisa ay maxkamaddu samaynayso.

4) Dhammaan Magdhowyada iyo Kharashaadaka uu soo gudbiyo Dhibbanuhu ama wakiilkiisu, maxakamadda ayaa dib uxaqiijinaysa, si loo ilaaliyo caddaaladda ay u baahan yihiin labada dhinacba.

5) Hadii dhibbanuhu yahay Qof Dumar ah, ayna dhacdo Galmo kufsi, waxaa Magdhowga lagu darayaa Meher u dhigma Maqaamka Qoftaas.

6) Amarka magdhawga ee hoos yimaadda qodobkan waxaa meel marinaya Maxkamadda ku shaqada leh, waxayna u fulinaysaa sida ku xusan qaanuunka dalka u degsan.

(6) Xaaladda sharciga degganaanta dalka ee Dhibbanaha ama ku noqoshada wadankiisa hooyo ama ka maqnaanshihiisa uu ka maqan yahay meesha Dacwadda maxkamaddu ka socoto, kama reebayso maxkarnadda in ay xukunto magdhaw sida qodobkani uu qabo.

(7) Haddii dembiiluhu yahay Qof mas'uul dawladeed ah, oo fal denbiyeed hoos imanaya xeerkan uu galo isaga oo adeegsanaya awooddiisa dhabta ah ama midda guud ee waddanka, waxaa maxkamadda u furan:

(a) inay dawladda ku amarto bixinta magdhaw la siiyo Qofka waxyeelloobay. Amarka maxkamadda ee dowladdu inay magdhaw bixiso waxaa ku jiri kara bixinta mid ka mid ah ama kulli kharashaadka ku cad faqradda 3aad iyo xarafaheeda hoos yimaada.

(b) Dhammaan magdhawga dawladdu bixiso waxay dawladdu u raacanaysaa eedaysanaha .

## Qodobka 32aad:
## La wareegidda qalabka Danbiga lagu galay

**(1)** Marka ay maxkamaddu guda-galeyso eedeynta, waxay amar ku bixineysaa in lala wareego qalabka, Hubka, Hantida iyo walxaha kale ee loo adeegsaday fulinta ama fududeynta fal-denbiyeedka sida ku qeexan sharcigan, waxyaabaha la xiriira faldanbiyeedka, xiritaan ku meel gaar ah ama mid joogto ah, goobaha loo isticmaalay in lagu fuliyo danbiyada.

**(2)** Hadii loo baahdo Maxkamaddu waxay amar ku bixin kartaa in la iibiyo Hantida Danbiga lagu galay si loogu bixiyo Magdhowga Dhibbanaha loo xukumay.

## Qodobka 33aad
## Mas'uuliyad Wadareedka Denbiilayaasha

Qof kasta oo amra, hoggaamiya, ku boorriya, dhiirri-geliya, kula taliya, ku qanciya, ku khasba, kiciya, ku diritaan sameeya, la maleega, ku caawiya Qof kale in uu galo fal denbiyeedka ku xusan sharcigaan, wuxuu mutaystaysanyaa haddii lagu cadeeyo fal denbiyeedka, ciqaabta u degsan danbiga uu wax ka maleegay.

**Qodobka 34aad**
**Gelidda wax ka badan hal Denbi ee Xadgudubyada Kufsiga**

Haddii la wada galo wax ka badan hal dembi ee debiyada ku xusan xeerkaan, ciqaab kasta waa in gaarkeeda loogu qaadaa dembiilaha iyadoon waxba laga dhimayn.

**Qodobka 35aad**
**Is-hortaagga Caddaaladda**

(1) Waxaa reebban is hortaagidda iyo faragalinta habsami u socodka caddaaladda, taasoo la xiriirta warbixinta baarista iyo dacwad oogista si waafaqsan qodobbada xeerkan.
(2) Qofkii lagu helo fal dambiyeed hoos yimaadda qodobkan, waxaa lagu xukumayaa xarig aan ka yarayn Labo sano kana badneyn Shan sano.
(3) Qof kasta oo isku daya fal denbiyeed hoos yimaadda qodobkan, waxaa lagu xukumayaa xarig aan ka yarayn Lix bilood kana badneyn Labo sano.

## CUTUBKA TODOBAAD

## HIRGELINTA XEERKA KUFSIGA

**Qodobka 36aad**
**Hirgelinta Qorshaha Fulinta Xeerka Kufsiga**

1. Wasaaraddu waxa ay ku diyaarin doontaa muddo 4 bilood ah, ka dib marka xeerkan dhaqan galo , qorshe 2 sano ah oo lagu fulinayo xeerka si taasi u hagto hawlaha hirgelinta xeerka iyo maaraayntiisa kaas oo kala cadayn doona masuuliyaadka, dejin doonana halbeegyo lagu cabbiro ka dhaqan gelinta sharciga ee dhammaan Gobolladda Dawladda Puntland .
2. Qorshe fulin hawleedka waxa uu noqon doonaa mid dib loo eego, waxna laga bedelo hadba marka loo baahdo arrintaas.
3. Si loo gaaro ujeeddada qorshe fulinta hawleed, Wasaaraddu waxay u tababari doontaa hay'adaha ay qusayso, ururrada iyo Dadwaynahaba guud ahaan ka hortagga iyo maxkamadaynta kufsiga ee ku xusan xeerkaan.

**Qodobka 37aad**
**Guddiga Gaarka ah ee Hirgelinta Xeerka Kufsiga**

Xeerkani waxa uu asaasayaa guddi gaar ah oo loogu yeeri doono "Guddiga Gaarka ah ee Fulinta iyo Maaraynta Arrimaha la xiriira danbiyada kufsiga '". Guddigu waxaa gudoomiye u noqon doona Wasiirka Wasaaradda , waxa uuna ka koobnaan doonaa–

i) Wasaaradda Caddaaladda , Arrimaha Diinta iyo Dhaqan Celinta ;
ii) Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Qoyska;
iii) Taliska Booliiska ;
iv) Xafiiska Maxkamadda Sare ;
v) Xafiiska Xeer-Ilaalinta ;
vi) Xafiiska Difaacaha Xuquuqul Insaanka ;
vii) Wasaaradda Caafimaadka ;
viii)Hay'adda Denbi Baarista ;
ix) Ama Hay'ad kasta oo loo arko mid muhiim u ah hawlaha Guddiga .

## Qodobka 38aad
## Soo saarista xeer-hoosaadyo

Wasaaraddu waxay soo saari kartaa iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ama hay'addaha caddaaladeed ee ay khusayso iyo Guddiga Fulinta Xeerka Xadgudubyada kufsiga, xeerar hoosaadyo laxiriira:

(a) Arrin kasta oo uu sharcigan ogolaaday in xeer hoosaad loo sameeyo;
(b) Hirgalinta iyo fulinta waaxyaha ay khusayso ee hay'adaha dawladdu u dhaqan galinayaan Xeerkan.
(c) wixii kale ee lagama maarmaan ah ama ah hab la dajiyo si loogu guuleysto ama sare loogu qaado ujeedooyinka Xeerkan.

# CUTUBKA SIDEEDAAD: AWOODDA MAXKAMADAHA

## Qodobka 39aad
## Maxkamadda Awoodda u leh (qaadista dacwadaha denbiyada Xeerka)

Marka la qaadayo Dacwad la xiriirta danbi kufsi, oo dhibbanuhu yahay rayid, waxaa wilaayada garsoor yeelanaaya maxkamadda rayidka ah, iyadoo aan loo eegin, haddii eedaysanuhu uu yahay rayid ama hawlwadeen ciidan.

## Qodobka 40aad
## Ikhtisaaska Maxkamdeed ee Dhaafsiisan Dalka

(1) Qofka muwaadin reer Puntland ah , ama haysta degganaansho joogta ah ee dhulka Puntland oo ku sameeya fal meel ka baxsan Puntland kaasoo loo aqoonsan lahaa dembi kufsi haddii lagu geli lahaa Puntland, waa dembiile kufsi waaxaana lagu xukumayaa ciqaab la mid ah danbiga ku xusan sharcigan.
(2) Qofka laguma qaadi karo danbiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan, hadii lagu waayay ama hore loogu xukumay waddan kale ama Maamullada kale ee Soomaaliya.

## CUTUBKA SAGAALAAD
## DIIWAANKA DENBIILAYAASHA KUFSIGA
### Qodobka 41aad
### Diiwaanka Denbiileyaasha Kufsiga

1. Waa in la sameeyaa diiwaanka lagu kaydiyo faahfaahinta denbiilayaasha lagu xukumay fal denbiyeedka kufsiga iyo danbiyada la halmaala .
2. Waxaa kali ah oo uu u furan yahay in ay arkaan diiwaanka danbiilayaasha kufsiga ay qusayso, hay'adda fulinta sharciga iyo hay'ad dawladeed oo dadwaynaha hawl u haysa .
3. Wasaaradda caddaaladda ayaa mas'uul ka ah gacan ku haynta diiwaanka danbiilayaasha xadgudubyada kufsiga.
4. Qof kasta oo lagu xukumo fal danbiyeed kufsi oo ka dhan ah ilmo carruur ah ama Qof Naafo ah, uma qalmi karo in uu u shaqeeyo xarun adeeg bixisa, hay'ad ama jimciyad adeeg siisa carruur ama dad Naafo ah.

## CUTUBKA TOBNAAD: BURIN IYO LAALIS

### Qodobka 42aad

### Burin

(1) Xeer kasta oo ka hor imaanaya xeerkan ama aan waafaqsanayn waa la laalay (waa wax kama jiraan) waxaana lagu bedalay xeerkan.
(2) Qodobada Xeerka Ciqaabta Soomaliyeed, Habka Xeerka Ciqaabta iyo Xeerarka kale ee ku haboon ee la jaan qaadi kara Qodobbada iyo ujeeddada Xeerkan, aanna ka hor imanayn Shareecada Islaamka, waxa lagu dabbaqayaa fal denbiyeedyada uu Xeerkani xeerinayo.

### Qodobka 43aad
### Dhaqan Galka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha wakiilladu ansixiyo, madaxweynuhuna saxiixo, laguana soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**